CONSUMER DIRECT CARE NETWORK WASHINGTON



MACMIILKA/WAKIILKA LA OGGALYAHAY

# Iska Diiwaangelinta Bogga Intarnetka ee DirectMyCare

## SIDA LA ISKU DIIWAANGELIYO

1. Furo barawsarkaaga intarnetka. CDWA waxay ku talinaysaa inaad isticmaasho Google Chrome.

2. Gal DirectMyCare.com

3. Ku dhufo badhanka **Register (Diiwaangeli)** si aad u furto bogga diiwaangelinta. (Sawirka. 01)




*Sawirka. 01*

4. Geli cinwaankaaga iimayl oo ku dhufo **Send Verification Code (Soo Dir Lambarka Xaqiijinta)**. (Sawirka. 02)




*Sawirka. 02*

5. **Bog cusub ka fur barawsarka** oo ka eeg cinwaankaaga iimayl lambarka xaqiijinta. (Sawirka. 03)
**Haddii aad aragto inaad xirtay bogga diiwaangelinta, waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho CDWA si aad dib ugu saxdo diiwaangelintaada.*




*Sawirka. 03*

6. **Ku laabo bogga diiwaangelinta** oo geli lambarka aad iimaylka ku heshay sanduuqa xaqiijinta. (Sawirka. 04)
   - Ku dhufo **Verify Code (Xaqiiji Lambarka)**.

   **Haddii aad u baahato lambar xaqiijin oo cusub, guji "**Send new code (Soo dir lambar cusub)**."*




*Sawirka. 04*

20221115

*ku sii socon doonto bogga xiga*

7. Samee lambar sireed.

8. Dib u qor isla lambar sireedkaas.

9. Geli magacaaga, magaca aabahaa, iyo magaca awoowgaa sanduuqyada banaan.

10. Dooro Ka Qaaybqaate, haddii aad tahay Macmiilka, ama Wakiilka La Oggalyahay.

11. U dooro Washington inay tahay gobalka adeegga lagu bixinayo ahaan.

12. Geli lambarka taleefonkaaga.

13. Geli taariikhdaada dhalashada oo u qoran qaabka BIL/MAALIN/SANAD.

14. Geli afarta tiro ugu danbeeysa ee Lambarkaaga Sooshiyaal Sekuuritiga.

15. Ku dhufo **Create (Samee)** si aad u dhamaystirto habsocodka diiwaangelinta.



*Sawirka. 05*

Ka dib markaad ku dhufato Samee, haddii ay kuu soo baxdo fariinta Sawirka. 06, fadlan la xidhiidh CDWA si aad u dhamaystirto diiwaangelintaada.

**Taleefonka**: 866.214.9899

**Iimayl**: infoCDWA@consumerdirectcare.com



*Sawirka. 06*

20221115